

MUXUU CANUGAGYGA U GARDARRO BADAN YAHAY?

NEWCOMER
PARENT
RESOURCE
SERIES

Hellida waxa aan dooneyno iyo waxa aan u baahannahay ayaa qayb ka mid ah nolosheena, laakiin inta badan carruurta yaryar ma ogaan karaan ama magaran karaan sida loogu sheegto baahidooda iyo rabitaankooda si degan ama iyagoo hadal isticmaalaya. Marka ay korayaan, carruurta waxay bartaan inay xakameyaan dareenkooda oo ayna ula dhaqmaan dadka kale si wanaagsan. Ilaa ay sidaasi dhacdo, sikastaba ha noqotee, carruurta yaryar waxaa laga yaabaa inay gardara badnaadaan iyagoo isku dayaya in ay is muujiyaan.

Ilmaha ayaa laga yaabaa inay dhuftaan, laadaan, qaniinaan ama qabtaan. Carruurta (1-3 sano jirka ah) ayaa waxaa laga yabaa in ay ku dhuftaan, ku laadaan, ku qaniinaan, ku qabtaan, qeyliyaan, timaha ku jiidaan, ku qanjaruufaan, ku riixaan ama madaxa kugu dhuftaan. Carruurta Xanaanada (3-6 sano jirka ah) ayaa laga yabaa inay sameeyan mid ka mid ah kuwaan waxaana laga yabaa inay ku feeran, cantuuf kugu tufaan iyo qayliyaan. Waxa kale oo laga yaabaa inay u hanjabaan, cagajugleeyaan ama dadka kale weeraraan. Carruurta oo soo maray muhaajirnimada khasabka ah ayaa laga yaabaa inay u badantahay in ay si gardarro badan u dhaqmaan.



Gardarrada Carruurta La Kulantay Muhaajirnimada Khasabka ah

Carruurta qaarkood ee la kulantay muhaajirnimada khasabka ah ayaa laga yaabaa in ay ku dhacday naxdin. Adiga iyo ilmahaaga ayaa laga yaabaa inaad lasoo kulanteen gardaro aad u daran, rabshad ama waxyeelo loo geysatay kuwa aad u jeceshahay. Waxaa laga yaabaa inaad la kulantay xaalado halis ah taasoo saameeyay cunugaada, xitaa haddii aad sameysey sida kugu wanaagsan ee aad ku badbaadiso canugaagaga. Dhacdooyinka oo noocaan oo kale waxay keeni karaan:

- Sida qof naxdin qabo oo kale in aad u dhaqanto, dhacdooyin rabshad leh oo lala yeesho dad kale ama dhooliga;
- In aad u dagaalanto inaad is badbaadiso (adigoo rumaysan in noloshoodu khatar ku jirto);
- Cabsi xoog leh oo ah in waalidkooda kala fogaanayaan, ka dibna dharbaahaxaya waalidka marka ay soo noqdaan;
- Dhufashada, qaniinyada, laadida ama feerida daryeel bixiyaha inta lagu jiro kala maqnaashada waalidkooda;
- Goosashada (ciyaarista inuu "dhintay") ilaa qof usoo dhowaado kadibna ku soo boodo;
- Cunto cunid badan, keediska, garaacista ama riixida dadka kale si ay cunto u helaan;
- Is-dhaawicida.

Maxay Carruurta Yaryar u Gardarro Badan Yihiin?

Waxaa jira sababo badan oo caruurta u dhaqmaan si gardarro leh!

- Carruurta waxay u maleynayaan in haddii ay dagaalamaan ay si dhakhsi ah u helayaan waxa ay u baahan yihiin.
- Carruurta waxay dareemaan awood marka ay dagaalamaan. Waxay jecel yihiin inay arkaan saameyntii ay geeysteen.
- Waxay hadda baranayaan isxakamaynta. Ma ay awoodaan in ay sugaan, ama fahmaan sababta, mana garanayaan sida kale ee loola tacaalo dareenkooda ama si ay u helaan waxa ay doonayaan.
- Waxay leeyihiin dareeno xoog leh oo aanay awoodin inay xakameyaan ama ay kuu sheegaan (xanaaq, jahawareer, walaac).
- Waxay u baahan yihiin dareen.
- Waxay u dhaqmayaan isla dhaqankii oo walaalahood waaweyn iyo walaashooda ay u dhaqmi jirren.
- Carruurta yaryar ayaa waxay mararka qaarkood jecel yihiin sawiwxnimada maqaarka wayna qaniinayaan iyo timaha ay soo jiidayaan.

Booqo cmascanada.ca/cnc/parents wixii macluumaad dheeraad ah oo waalidiinta laba luuqadlaha ah



SUPPORTING CHILD CARE IN THE SETTLEMENT COMMUNITY / SOUTIEN DE LA GARDE DES ENFANTS DANS LA COMMUNAUTÉ DE RÈGLEMENT

Funded by: Immigration, Refugees and Citizenship Canada / Financé par : Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada